



Guud ahaan SU'AALAHADA BADANKA LAYSWAYDIIYO

- Miyaa cunugaygu ku haboon yahay inuu raaco baska?
 - Waxaad ka raadin kartaa macluumaadkan wabsaaytka Degmadeena adigoo isticmaalaya agabka baadhista baska. <https://www.fwps.org/Page/365>
 - Ka waran hadaan ku noolahay agagaarka dugsiga oo waxa aan daganahay meel u dhaw halkan baska istaago?
 - Ardayda dagan agagaarka dugsiga looma ogola inay bas soo raacaan.
 - Sideen ku heli karaa gaadiidka cunugayga kaasoo kujira Barnaamijka Doorashada?
 - Waalidka/masuuliyiinta ardayda ka diwaangashan Barnaamijka Doorashada waxay masuul ka yihiin gaadiidka meelaha ka baxsan goobta la daganyahay ee dugsiga.
- Waa maxay wakhtiga ay tahay in cunugu sii joogo halka basku istaago?
 - Ardaydu waa inay joogaan halka baska laga raaco shan (5) daqiiqo kahor inta aanu basku iman.
- Waa maxay wakhtiga basku kabaxayo dugsiga galabtii?
 - Basaska waawayn waxay iskuulka kabaxaan todoba (7) daqiiqo kahor kadib marka jalasku dhaco. Basaska Waxbarashada Gaarka ah waxay baxaan marka dhamaan ardayda ay fuulaan.
- Sideen ku ogaanayaa haddii halka basku istaago ee cunugayga isbadalo?
 - Ardayga kaasoo raaca baska waxbarashada guud dirawalka ayaa u sheegi doona ogaysiiska wakhtiga isbadalay 48 saacadood kahor intaanu isbadalku hirgalin.
 - Ardayda baska Waxbarashada Gaarka ah, waalidku waxay heli doonaan C51 ama waxa u yeedhi doona dirawalka.
- Sidee goobaha basasku istaagaan lagu go'aamiyaa?
 - Kooxda Gaadiidka ee Degmada Dugsiga Federal Way ayaa go'aaminaya tilmaamaha soo socda ee goobaha basasku istaagaan iyo sharciyada xaaladaha badqabka iyo dhibaataada iyadoo loo hogaansamayo Xeerarka Maamulka Washington, iyo Xeerarka Dib u Eegiska Lagu Sameeyay ee Washington (RCM). Ardayda waxa loo baahanyahay inay isticmaalaan wadada basku istaago ee loo qoondeeyay.
- Miyaa cunugaygu usii raaci/kana soo raaci karaa baska xanaanada?
 - Haa, ogolaanshaha xanaanada wuxuu ku jiraa goobta baska ee dugsiga. Si kastaba ha ahaatee, basaskeena uma adeegaan si toos ah xanaanada oo waxa laga yaabaa in ardaygu uu u baahdo inuu u lugeeyo/kagana soo noqdo goobta basku istaago.
- Ardaygaygu ma lahaan karaa hal cinwaan waxkabadan oo gaadiid?
 - Ardayda waxay yeelan karaa kaliya hal meel oo laga qaado iyo hal meel oo guriga loogasoo qaado. Ma bixino gaadiidka goobaha kala duwan ee maalmaha kala duwan ee todobaadka.
 - Hal kiis oo ka gaar ahi waxa weeyi in ardaydu leh guryaha labada waalid ay iska diwaangalin karaan guryaha labada waalidba si looga soo qaado loona geeyo.



- Sideen ku arki karaa macluumaadka wadada baska ParentVue?
 - Waxaad ka heli kartaa macluumaadkan adiga oo gelaya ParentVUE oo aad tagtid taabka "Macluumaadka Ardayga".
- Miyaa ardaygaygu raaci karaa baska guriga saaxiibkii?
 - Inuu cunugu u raaco guriga saaxiibkii si kumeelgaadh ah waxay u baahantahay ogaysiis qoran oo ka yimaada waalidka iyo ansixin ka timaada xafiiska dugsiga. Ansixinta mar walba suurtagal ma aha sababtoo ah waddooyinka qaarkood oo si dhamaystiran u shaqeynaya.
- Miyaa cunugayga laga joojinayaa adeega baska hadaanu raacin tilmaamaha dirawalka?
 - Haa, ardayga waa laga joojinayaa adeega baska iyadoo ku xidhan heerka anshaxa ee shaqaynaya ama haddii talaabooyinkoogu ay jabinayaan nidaamyada badqabka kuwaasoo loo dajiyay in lagu ilaaliyo iyaga iyo kuwa kalaba.

SPED/MKV SU'AALAH A INTA BADAN LAYSWAYDIIYO

- Sideen u habeeyaa gaadiidka cunugayga baahiyaha gaarka ah qaba/MKV?
 - Waxaad u baahan doontaa inaad la xidhiidho maamulaha kiiskaaga IEP ama dhakhtarka dugsiga si uu usoo gudbiyo codsi gaadiid oo ah gaadiidka Waxbarashada Gaarka ah.
 - Si aad u codsato MKV, waxaad u baahan doontaa inaad la xidhiidho xafiiska MKV ee dugsiga cunugaaga.
- Intee inleeg ayay qaadanaysaa inaad bilawdo gaadiidka SPED/MKV?
 - Waxay qaadan kartaa ilaa shan (5) maalmood oo dugsi marka waraaqaha laga helo maamulaha kiiska IEP ama xafiiska MKV.
 - Waxay qaadan kartaa shan (5) maalmood marka waraaqaha la helo iyo sidoo kale dhamaan isbadalada gaadiidka.
- Marka ardayga Waxbarashada Gaarka ah laga saaro wadada baska?
 - Kadib shan (5) cisho oo wadasocda basku wuxuu joojin doonaa inuu soo doono ardayga ilaa iyo ay waalidku soo wacayaan si adeegii loosii wado. Kadib 21 maalmood, ardaygu waxa laga saarayaa dariiqaha baska. Marka ardayga laga saaro wadada, waalidku waxay u baahan doonaan inay la xidhiidhaan maamulaha kiiska IEP si loo gudbiyo codsi in gaadiidka dib loo bilaabo. Tani waxay qaadanaysaa ilaa shan (5) cisho oo wadada dugsiga ah.
- Miyaa ardaygayga Waxbarashada Gaarka ah lagu sii dayn karaa baska iyada oo anay waalidka/masuulku joogin?
 - Ardayda Waxbarashada Gaarka ah kaliya waxa lagu sii dayn karaa marka waalidku saxeexaan foomka sii daynta. Foom cusub ayaa loo baahanyahay in la saxeexo sanad kasta.
- Miyaa basku iman karaa albaabkayga?
 - Waxaan nahay degmo guri ilaa guri ah. Baska dugsigu kaliya wuxuu iman karaa albaabka haddii ardaygu indho la'ayahay ama uu kursiga dadka naafada ah ku fadhiyo.
 - Ardayda u qalma adeegyada McKinney Vento waxa loo duwayaa guud ahaan goobaha basasku istaagaan.



- Haddii cunugaygu helo gaadiidka iyadoo loo marayo gacanta sadexaad (HopSkipDrive, A&A, ALC), halkeen ka heli karaa macluumaadka wadadooda?
 - Qandaraaslayaashada gacanta sadexaad waxay soo diraan casuumaada ablikayshanka dhamaan masuuliyiinta/daryeel bixiyaasha kuwasoo ardaydoodu ay isticmaalana adeegooda; ablikayshankan wuxuu u ogolaanayaa masuulka/daryeel bixiyaha inay dheehdaan macluumaadka ardaydooda.
- Miyaa walaalahooda kale la raaci karaan baska ardayda Waxbarashada Gaarka ah?
 - Adeegan waxa la yidhaahdaa isdhexgalka oo waxa uu u baahanyahay in waalidku buuxiyaan foomka codsiga kaasoo laga heli karo dirawalkooda ama iyagoo la xidhiidhaya Qaybta Gaadiidka. Waxa la ansixinayaa iyadoo lagu salaynayo kiisba-kiis oo waxa go'aaminaya goobta laheli karo. Ardayga qaba Waxbarashada Gaarka ah wuxuu leeyahay kursi tixgalin.

SU'AALAHA BADANKA LAYSWAYDIIYO ee Badqabka

- Waa maxay goobta khatarta ah ee ku wareegsan baska dugsiga?
 - Goobta khatarta ahi waa meel bannaan oo ku wareegsan baska dugsiga oo ku fidsan 10 feets (10 tallaabo oo waaweyn) dhammaan jihooyinka halkaas oo darawalka basku aanu arki karin ardayda.

Ardayda kuwaasoo wadada ka talaabayaa waa inay:

1. Isha kala hadlaan dirawalka.
 2. Sugaan calaamada dirawalka uu ugu sheegayo marka ay badqabto ee la talaabi karo.
 3. Hubiyaan inay badqabto (eegaan bidix, midig, hadana bidix markale).
 4. Waligaa haka talaabin baska xagiisa dambe.
- Sideen ku ogaan karaa faah-faahin dheeraad ah oo ku saabsan badqabka baska dugsiga?
 1. Waxa jira khayraad badan oo online ah kuwaasoo qoysasku ay ka ogaan karaan waxyaabo badan oo ku saabsan ilaalinta badqabka caruurta ee ku wareegsan baska dugsiga.

[Xaqiiqooyinka Baska Dugsiga ee ay Dajiyeen Golaha Baska ee Dugsiga Maraykaynka Badqabka Baska Dugsiga ee ay Dajisay Maamulka Badqabka Wadooyinka Waawayn ee Qaranka \(NHTSA\)](#)

- Miyaa cunugaygu la iman karaa qalab muusig oo wayn baska dhexdiisa? Qalabka lagu socdo?
 - Qalabyada qaar aad bay u weyn yihiin in lagu qaado baska dugsiga. Ardeyda waxaa laga filayaa in ay qaataan/dejiyaan qalabkooda oo ay ku hayaan dhabta ama lugaha dhexdooda inta ay socdaan guud ahaan baska. Haddii aanay suurogal ahayn, ardaydu waxay waydiin doonaan inay sameeyaan habayno kale si ay u saaraan qalabka.

Agabka Loo Ogolyahay Baska Dugsiga

- Alto saxophone (Sasifoon)
- Clarinet (Kalinat)
- Flute (Fuluut)
- Trombone (Taranboon)
- Trumpet (Tambat)
- Violin (Faayolin)



Qalabka Aan La Ogolayn In Baska Lala Raaco

- Baritone horn (Baaritoon hoon)
- Bass viola (Baas fiyoola)
- Cello (Seelo)
- Drums (Durbaano)
- French horn (Hoonka Faransiiska)
- Tenor saxophone (Sasafoonka Teenar)

Sideen u codsan karaa si aan u noqdo dirawal bas?

- Waxaad tagtaa wabsaaytka Degmada fwps.org taababka kusi jira waxaad gujisaa xirfadaha.